

# SIDA AY U SHAQEYSO:

## Adeegyada Taageerada Maalinta

Ma is weydiinaysaa sida aad u bilaabi karto Adeegyada Taageerada Maalintii ee Lifeworks? Hoos ka akhri guudmarkayaga haddii aad wax su'aalo ah qabtid, fadlan ha ka waaban inaad nala soo xidhiidho:

**651-365-3773 | [referrals@lifeworks.org](mailto:referrals@lifeworks.org)**



### Buuxi qiimeynta MnChoices.

Hanaanku wuxuu ku bilaabmaa booqasho uu sameeyo qiimeeyahu kaas oo wax ka barta baahiyahaaga, yoolalkaaga, iyo dookhyadaada; macluumaadkan ayaa go'aaminaya u-qalmitaankaaga, qaddarka taageerada ee la oggolaaday, iyo fursadaha adeegga. Si aad u codsato qiimeynta MnChoices, la xidhiidh degmadaada ama Disability Hub MN: 1-866-333-2466.



### La xidhiidh shaqaale bulsheed.

Kadib marka lagu oggolaado inaad hesho taageero, shaqaale bulsheed ayaa lagugu meelayn si uu kaaga caawiyo doorashada bixiye iyo bilaabida adeegyada.



### Xulo bixiye.

Shaqaale bulsheedku waxa uu wadaagi karaa liiska bixiyayaasha sida Lifeworks si uu u bixiyo adeegyada.

Waxaad ka baari kartaa bixiyayaasha kala duwan intarneetka si aad wax badan uga ogaato mid kasta qaab-hawleedkiisa iyo taageerada la heli karo.



### La xidhiidh bixiyahaaga.

Mar hadaad dooratay bixiye, waxa la joogaa wakhtigii aad bilaabi lahayd hanaanka bilowga adeega. Halkan Lifeworks, marka ugu horeysa ee aad nala soo xidhiidho, waxaanu wadaagnaa macluumaadka ku saabsan ururkayaga iyo sida adeegga la codsaday u shaqeeyo. Haddii aad ku qanacdo in Lifeworks noqoto bixiyahaaga oo la go'aamiyo inaan bixinayno adeegga aad rabto, kooxdayadu waxay la xidhiidhi doontaa shaqaalahaaga bulshada si ay u dhammeystiraan oggolaanshaha adeega.



### Waxaa la qaban doonaa kulanka qaadashada (diiwangelinta) iyo buuxinta waraaqaha.

Kulamada qaadashada ee Lifeworks waxa lagu qabtaa taleefanka ama Zoom. Inta lagu jiro qaadashada, waxaad la kulmi doontaa shaqaalahaaga taageerada Lifeworks kuwaas oo wax badan kaa baran doona kaana caawin doona tallaabooyinka xiga. Warqadaha loo baahan yahay ayaa laguugu soo diri doonaa iimeyl si aad u buuxiso waxaana ku jira waxyaabaha ay kamidka yihiin: xeerarka asturnaanta, macluumaadka xidhiidhka, iyo qaar kale. Marka kulanka qaadashada la qabto ee waraaqaha la saxeexo lana soo gudbiyo, adeegyadu way bilaabmi karaan!



### Ka qeybgal kulanka hubinta.

Adeeg kasta oo cusub oo laga helo Lifeworks, waxaan qabanaa kulanka hubinta ee 45ka-maalmood ah, si aan dib ugu eegno khibradaada una xaqiijino in taageerada la bixiyo ay ku habboon tahay baahiyahaaga.



### Hawlahaagu way dhan yihiin.

Lifeworks waxay u ahaan doontaa taageero adiga iyo kooxdaada. Wixii immika ka dambeeya, waxaanu sii wadi doonaa inaan kula kulano sannad walba si aan uga wada hadalno isbeddelada iman kara una qiimeeyno adeegyada.

Lifeworks waa 501 (c) (3) aan faa'iido doon ahayn iyo Loo-shaqeeye Fursad Siman Bixiya. Macluumaadkan waxaa lagu bixin karaa qaab kale haddii la codsado.